Waa maxay masuuliyadaha degmo dugsiyeedka sida uu dhigayo Qaybta 504?

Qaybta 504 waa barnaamij lagu meelo xarunta barnaamijyada tacliineed ee kale ee caadig ah ee dhismaha dugsiga. Xubnaha shaqaalaha dugsiga iyo waalidku si wadajir ah ayey uga shaqeeyaan si ay u soosaaraan qorshe Qayta 504 kaasi oo caawin doona in ardaygu ka faa'ido barnaamijka tacliineed iyo hawlaha dugsiga.

Si ay u raacdo Qaybta 504, degmo dugsiyeedku waa inay:

1. U magacowdaa isu-duwe 504
2. Bixisaa dariiqooyin ashkato si ay u xalliso cabashooyinka. (Fiiri http://sts.dpsk12.org/)
3. Bixisaa ogaysiiska takoor la'aanta oggolaanshaha iyo galaangal u yeeladka barnaamijyadeed ama hawlaheeda
4. Si sannadle ah u aqoonsataa una sheegtaa goobta ay joogaan carruurta mutaysatay ee leh naafada kuwaasi oo aan helayn tacliinta dadwaye
5. Si muddaysan u ogaysiisaa dadka naafada ah iyo waalidkood ama wakiilada masuuliyadaha degmada sida uu dhigayo Qaybta 504
6. Ogaysiiso waalidiinta ama wakiilada xuquuqdooda inay kahor yimaadaan go'aanada la xidhiidha aqoonsiga, qiimaynta ama meelaynta. (Fiiri: http://sts.dpsk12.org/)
7. Fulisaa is-qiimayn siyaasadaha degmo dugsiyeedka, barnaamijyada iyo dabbakhaadaha si ay u hubiso takoor inaanu dhacay.
8. Siisaa waalidiinta fursadda ay ku baadhayaan diiwaanada ku tacaluqa.

Siay Dugsiyada Dadwaynaha Denver u buuxiyaan masuuliyadahooga?

- ✓ Siinta waalidiinta warqaddan ogaysiinaysa dhawrisahooga dariiqadeed
- ✓ Qaybta 504/ADA ee fayl garaysiga cabashooyinka ee ka jira dugsi kasta.
- ✓ Magacabaabista isu-duwayaasha 504 heerarka degmo iyo dugsi.
- ✓ Aqoonsiga iyo tabobarka isu-duwayaasha dhismayaaha 504 goob dugsi oo kasta

---

Haddii aad hayso su'aalo kusaabsan Qaybta 504 oo la xidhidha ardayda wac:

Qaybta Adeegyada Ardayda
Dugsiyada Dadwaynaha Denver
(720) 423-8086

Macluumaad dheeraad ah waxa laga heli karaa Waaxda Tacliinta Maraykanka Xafiiska Xuquuqda Rayidka, Region VIII, Federal Building, Suite 310, 1244 Speer Blvd.,
Denver, CO 80204-3582; Taleefanka (303) 844-5695.

Rev. 11/2011

DENVER PUBLIC SCHOOLS
Discover a World of Opportunity™

Ma jiro Takoor Naafada

Hagaha Qaybta 504 ee Xeerka Baxnaaninta 1973 marka ay la xidhiidho ardayda

Dugsiyada Dawlada Denver
900 Grant Street
Denver, Co 80203
(720) 423-8086

Waa Maxay Qaybta 504?

Qaybta 504 ee Xeerka Baxnaanintu 1973 waa sharci xuquuqda rayidka oo dhawraha dadka naafada ah in la takooro. Wuxuu sheegayaa:

"Waa inaan qof mutaysay oo naafo ah habayaraatee naafadiisa darteed looga saarin kaqaybqaadashada, loogu diidin dheefaha, ama loogu samayn tarkoor barnaamij ama hawl kasta oo uu ku helayo kaalmada dhaqaalaha dawladda dhexe."Xeerka Dadka Maraykanka ee Naafada ee 1990 waxa ku qoran mamnuuc tarkoorista ah oo la mid ah.

Ilaa markii la ansixiyey Xeerka Baxnaaninta ee 1973 iyo xukumadiisa fulineed, degmo dugsiyeedkayda waxa laga rabaa inay ka dhigaan barnaamijyadooda iyo hawlahooga qaar ay heli karaan cid kasta oo naafo ah in la siiyo ardayda naafada ah tacliin dadwayne oo habboon oo bilaash ah. Ardaydu waxay u baahan kartaa tacliin ama adeegyada la xidhiidha, waafajino, ama geddino lagu sameeyo barnaamijyadooda dugsiga.

Goorma ayuu arday mutaysanayaa dhawris sida uu dhigayo Qaybta 504?

Arday wuxuu mutaysanayaa dhawris sida uu dhigayo Qaybta 504 marka uu leeyahay liidasho jidheed ama maskaxeed taasi oo si aad ah u xaddidaysa mid ama kabadan hawlaha nolosha ee waawayn, oo ay kamid yihiin:

- is-daryeelista qofka
- qabashada hawlaha gacanta laga qabto
- lugaynta
- aragga
- neefsiga
- maqalka
- hadalka
- akhriska
- barashada
- awood saarista

Marka xaalad ayna *si wayn* u xaddidayn hawl nololeed oo wayn, qofku mutaysan maayo dhawrista sida uu dhigayo Qaybta 504.

Waa maxay habka Qaybta 504 Dugsiyada Dadwaynaha Denver?

Isu-duwaha dugsigu wuxuu:

- Heli tabashada macalimiinta, waalidiinta, kalkaalisooyinka, la-taliyayaasha, ardayda iyo dadka kale
- Isugu yeedhi koox dad ah oo aqoon u leh ardayda si ay u ururiyaan oo dib ugu eegaan macluumaadka kusaabsan ardayga ee meelo badan ka yimi
- La shaqayn kooxda si ay dib ugu eegaan xogta kusaabsan ardayga si ay u go'aamiaan haddii ardaygu uu leeyahay liidasho jidheed ama maskaxeed taasi oo si aad ah u xaddidaysa hawl nololeed oo wayn, oo markaas, uu yahay arday naafo ah sida ku cad sida uu dhigayo Qaybta 504
- Xubin kooxda ka mid ah ahaan wuxuu go'aamin haddii, naafo jirta darteed, baahida tacliineed ee ardaygu aan loo buuxin si ku filan si la mid ah baahiyaha ardayda aan naafada ahayn si ardaygu u mutaysto tacliin dadwayne oo habboon oo bilaash ah
- Kadib marka kooxdu go'aamiso in arday uu mutaystay dhawrista sida uu dhigayo Qaybta 504, la shaqeeyo kooxda si ay u soosaaraan qorshe Qaybta 504 oo ardaygu leeyahay
- Kaqayb ahaan kooxda go'aamiyaa baahiyaha ardayga marka ay la xidhiidhaan naafada la aqoonsan yahay
- Dhammaystiraa qorshaha Qaybta 504 isaga oo iftiiminaya tacliinta ama adeegyada, waafajinaha macquul ah, ama geddiysta uu ardaygu u baahan yahay
- Qorsheeyaa taariikh kulan dib-u-eegis
- U diraa nuqulada qorshaah dadka loogu talogalay
- La socdaa fulinta qorshaha
- Dib isugu yeedhaa kooxda taariikhda lagu heshiiyey si dib loogu eego oo loogu qiimeeyo wixii isbeddel xaaladda ah
- Qaban kulan kala-guur marka ardaygu u wareegayo dugsi cusub iyo/ama u diraa nuqulada elektarooniga ah ee Qorshaha 504 dugsiga cusub si ay diiwaanada u gashadaan

Maxay samaynta waafajino ka dhigan tahay?

Arday badan kuwaasi oo xaq u leh ilaalinta Qaybta 504 waxa ay u baahan doonaan waafajino macquul ah si ay u helaan faa'idada barnaamijyada waxbarashada ee dugsiyada si la mid ah sida facooda aan naafada ahayn. Waafajinuhu waa hagaajin ay samaynayaan macalinka fasalku iyo shaqaalaha kale ee dugsigu si ay uga caawiyaan ardaydu inay helaan faa'idadan oo kale. Ardayda kale waxa ay u baahan doonaan waafajino macquul ah si ay u xalliyaan tabashooyinka caafimaad si ay galaangal ugu yeeshaan barnaamijyada Degmada.

Tusaalayaasha Waafajinaha Guud

- Layliyo kooban(s)
- Sare ugu dhawaaq imtixaanada
- La siiyo buugaag dheeri ah marka guriga
- La fadhiisiyaa ardayga meel ka fog kombuyuutarka/buuqa hoolka
- La siiyaa hagayaal waxbarasho inta ka horaysa in la baro qalab cusub
- Ardaygu inuu barto isticmaalka qorsheeyaha
- Siinta barista faca/caawiye
- U oggolaw ardayga inuu isticmaalo kombuyuutar kiiboodhka layliyada qoran fasalka dhexdiisa

Waafajinuhu waxa ay u baahan yihiin in xisaabta loogu daro awoodaha shaqo ee shakhsiga iyo hababka kale ee qabashada shaqooyin ama hawlo si uu ugu oggolaado ardayga inuu muujiyo barashadiisa.

- Waafajinta waa in la shakhsiyadeeyaa
- Waafajinta waxa loogu talogalay inay ardayga naafada ah siiyaan fursad la mid ah oo uu kaga faa'ido barnaamijyada caafimaadka ee dugsiga.
- Waafajinta ma beddelaan istaandarrada waxbarashada ee ardayga laga filayo inuu gaadho.
- Dhibtooyinka gaarka ah ee uu leeyahay ardayga naafada ahi waxa ay u oggolaan karaan isbeddelo, ama isbeddel, istaandarrada waxbarashada kaasi oo ardayga laga filayo inuu buuxiyo.